
# Diiwaan-gelinta Dugsiyada Magaalada Columbus




1. Booqo ccsoh.us. Guji "Enroll".
2. Dib u eeg Taariikhaha Muhiimka ah
3. Soo Ururso Waraaqaha Diiwaan-gelinta Waajibka ah (Fiiri bogga dambe)
4. Dhammaystir Diiwaan-galinta Onlaynka ah/Speedy Pass
    a. Waa lama huraan in aad soo geliso Dukumiintiyada Diiwaan-gelinta lagama maarmaanka ah  (Necessary Enrollment Documents). Dukumiintiga aan saxda ahayn ayaa dib u dhigi kara hab-socodsiinta Onlaynka Diiwaan-gelinta/Codsiga Diiwaan-gelinta.




5. Khabiirka Diiwaan-gelinta ayaa dib u eegi doona OLR oo ka baaran-degi doona hab-socodka diiwaan-gelinta, waase haddii dhammaan Dukumiintiyada Diiwaan-gelinta Lagama maarmaanka ah la soo geliyo
6. Khabiirka Diiwaan-gelinta ayaa iimayl u diri doona/waci doona waalidka/masuulka dugsiga diiwaan-gelinta, taariikhda bilawga iyo diyaarinta xogta Xiriirka Waalidka (Parent Portal)
7. Waalidka/mas'uulka ayaa markaas diyaarin doona Xiriirka Waalidka (Parent Portal).

    - Xiriirka Waalidku (Parent Portal) wuxuu kuu ogolaanayaa inaad aragto xogta ardaygaaga (sida darajooyinka, imaanshaha, jadwalka...), bixinta kharashka, codsiga meelaynta Pre-K ama Bakhtiyaa-nasiibka Xulashada Dugsiga (K-ilaa12-aad) iyo in ka badan, aad u badan.

**Columbus City Schools**
**Central Enrollment Center**
430 Cleveland Avenue
Columbus, Ohio 43215
Taleefanka: (614) 365-4011

Si aad u bilawdo diiwaangalinta ilmahaaga ee Columbus City Schools, ka buuxi diiwaangalintaada SpeedyPass ee onlaynka ah halkan ccsoh.us, kadibna soo ururso oo u hawlgal dhammaan waraaqaha loo baahan yahay waxaanad keentaa Xarunta Dhexe ee Isqorista si aad u dhammaystirto hannaanka diiwaangalinta.

## Dokumentiyada Daruuriga ah

- **Aqoonsiga Sawirka leh ee Waalidka:**
  Waxa muhiim ah inaanu xaqiijin karno aqoonsiga dadka codsanaya qorista ilmahooga ee Columbus City Schools. Fadlan u diyaarsanaw inaad na tusto aqoonsiga sawirka leh wakhtiga booqashadaada.
- **Xaqiijinta Aqoonsiga Ardayga** (waxa waajib ah in la keeno **mid** ka mid ah waxyaalaha soo socda)
  - Shahaadada Dhalashada Ardayga (xaqiijinta dhalashada ee ay bixiso Ohio shahaado la mid ah oo uu bixiyey gobol, dhul, waddan la haysto ama qaran). Haddii waalidka/masuulka ilmuhu u baahan yahay inuu soo qaato shahaado dhalasho, wuxuu ka wici karaa Bureau of Vital Statistics 614-645-7331. Fadlan ogow in arday kasta oo laga yaabo inuu xiisaynayo inuu kaqyabqaato ciyaaraha dugsiyada ka dhexeeya ay waajib ku tahay inuu haysto wax da'diisa caddaynaya iyadoo la adeegsanayo shahaado dhalasho. Ma jirto caddayn kale oo da'da ah oo la aqbali karo Ohio High School Athletic Association.
  - Baasaboor ama taraaniskirib la xaqiijiyey ee baasaboor oo laga xereeyey diiwaanhayaha baasaboorada oo muujinaya taariikhda iyo goobta dhalashada ee ilmaha
  - Taraaniskirib la xaqiijiyey ee shahaadada dhalashada; taraaniskirib la xaqiijiyey ee shahaadada baabsitamka ama diiwaan diimeed oo kale oo muujinaya taariikhda iyo goobta dhalashada ee ilmaha
  - Taraaniskirib la xaqiijiyey ee diiwaan isbitaal oo muujinaya taariikhda iyo goobta dhalashada ilmaha; ama waraaqda dhaarta dhalashada.
- **Caddayn Cidda Haysa/Ka Masuulka ah** (haddii aanu ahayn waalidka dhalay/aagga dugsiga deggan)
  Waraaqda Haynta - Nuqul la xaqiiyey oo tilmaamaya amarka ama wax-ka-baddalka xaakinka ee amarka noocan ah oo sheegaya xuquuqda iyo waajibaadka waalidka oo magacaabaya waalidka aagga dugsiga deggan iyo ilaaliyaha sharciga ah ee ilmaha (hadday khusayso).
- **Xaqiijinta Cinwaanka** (waxa waajib ah in la keeno **mid** ka mid ah waxyaalaha soo socda):
  - Biilka korontada/biyaha iwm. oo dhawaa (gaasta, korontada ama biyaha) oo magaca waalidka/masuulku ku qoran yahay. (**Biilasha taleefanka iyo telefishanka lama aqbalo**).
  - Heshiis kiro oo hadda taagan oo magaca waalidka/masuulku ku qoran yahay. Magaca iyo lambarka taleefanka ee mulkiilaha waxa waajib ah in la bixiyo si loo xaqiijiyo kirada. Bogga saxeexa waxa waajib ah in la bixiyey.
  - Laba hubinta shaqaalaha oo ah kuwii ugu dambeeyey oo ay ku qoran yihiin magaca iyo cinwaanka waalidka/masuulku.
  - Jeegga mushaharka shaqaalaha ugu dambeeyey, oo laga helay Waaxda Adeegyada Aadanaha ama Sooshiyaal Sikiyuriti, oo waalidka ku socda.
  - Bayaan ka socda Waaxda Adeegyada Aadanaha ama Sooshiyaal Sikiyuriti, madaxa waraaqda yaala, oo tilmaamaya cinwaanka waalidku u isticmaalo helitaanka hubinaha. Xataa haddii waalidku leeyahay hubino sanduuqa boosta loogu soo diray, shaqaalaha kiiska ayaa laga yaabaa inuu ku bixiyo xaqiijinta cinwaanka ee waalika, madaxa waraaqda wakaaladda.
  - Bayaan ka socda Xafiiska Shaqaalaha ee loo-shaqeeyaha waalidka, oo madaxa waraaqda ku yaala, oo muujinaya cinwaanka waalidku u isticmaalo ujeedooyin shaqaalayn iyo arrimaha gudbinta foomamka Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) W-2.
  - Isbaddal ah foomamka ilaalinta ee madaxa waraaqda ee Franklin County Children Services (FCCS) ama dokumentiyada maxkamadda oo muujinaya isbaddal ah waalidka ilaalinta (iyo cinwaanka). Kuwan waa in loo gudbiyo Division of the Registrar kahor inta aan ilmaha laga diiwaangalin dugsigaaga. Haddii ilmaha hore loo qoray uuna sii wadanayo halka lagu qoray, waalidka ilaalinta ee cusub ayaa u baahan doona inuu aado Division of the Registrar Office si uu u xeraysto waraaqaha.
  - Su'aalaha Guryeynta
  - Xaqiijinta Guriga
- **Diiwaanka Tallaalka** (Diiwaanka Muditaanka)
  Si ay u hubiso in dhammaan dugsiyadu ay bixiyaan bii'ad badbaado iyo caafimaad leh oo waxbarasho, Ohio Department of Health waxay waajib ka dhigtaa in ardayda oo dhan markay isqorayaan ay tallaalan yihiin. La xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ee wakhtigan si aad u hubiso in tallaalada dugsigu u baahan yahay uu ilmuhu dhammaystay. Haddaad u baahan tahay kaalmo tallaalka ah, fadlan la xiriir kalkaalisada caafimaadka dugsiga ama Columbus Public Health Immunization Clinic 614-645-7945.
- **Waraaqaha ka Tagidda ama Kaadhka Fasalkii u Dambeeyey ama taraaniskiribka dugsi hore** (hadday khusayso)
- **Barnaamijka Waxbarashada la Khaasyeelay (IEP), Warbixinta Kooxda Qiimaynta (ETR) ama Qorshaha 504** (hadday khusayso)
- **Caddayn sheegaysa natiijooyin inaanu Qaaxo Qabin taasi oo ka timi baaritaan lagaga qaaday Maraykanka. Khusaysa ardayda ku dhalatay waddan kale AMA waddanka safar kaga maqnaa ≥ 60 maalmood**.
- **Xaqiijinta Dakhliga** (Waalidiinta Xanaanada oo Kaliya)
  **Marka la eego go'aaminta dakhliga qoyska, qoyska waxa loo go'aamiyaa:**
  - Dhammaan waalidiinta/masuulada sharciga ah ee ilmaha ee deggan guriga iyo dhammaan carruurta yaryar ee waalidka/masuulka sharciga ah ee guriga deggan
  - Aayo/adeer deggan guriga, iyo dhammaan carruurta yaryar ee guriga deggan.
  - Waalidiinta aan isqabin ee ilme ka dhexeeyo kaasi oo guriga la deggan iyo dhammaan carruurta yaryar ee guriga ku nool
  - Waalid koriye ah iyo dhammaan carruurta yaryar ee guriga deggan

  **Dakhliga qoyska waxa ka mid ah dakhliga guud la kasbaday iyo dakhliga aan la kasban ee qoyska. Tusaalayaasha dakhliga guud ee la kasbaday, iyo kan aan la kasban waa sida soo socota:**
  - Mushaharka guud ee saacadlaha, wakhtiilaha, mushaharka nabadgelyeynta, gunnooyinka, mushaharka saacaddii ee fasaxa jirrada, mushaharka fasaxa sanadlaha, ciidaha iyo mushaharka fasaxyada
  - Dakhliga aan la kasban waa dakhliga aan qofka ka soo galin cid uu u shaqeeyo ama uu isagu gooni u shaqaysto. Dakhliga aan la kasban waxa ka mid ah kaalmada waxbarasho, lacagaha biilka iyo masruufka ilmaha, iyo hadiyadaha ama kaalmada uu qoyska ka helo shakhiyaad, ururo ama hay'ado wax kaalmeeya, sida naafonimada maamulka sooshiyaal sikiyuuriti (SSA), magdhawga bilaa camalka, lacagaha la siiyo ciidamada hawlgabay, faa'idooyinka dadka badbaaday, magdhawga shaqaalaha kumeel gaarka ah, iyo dakhliga hawlgabka ama tarmiiska.